

JUMHURIYADDA SOOMALILAND


IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2019

AF-SOOMAALI



GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA





Total Score

Magaca.....

Dugsiga

R/Lambar.....

JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND

GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA SOMALILAND

FASALKA AF-RAAD

**IMTIXAANKA
AF-SOOMAALI**

Juuun 2019

Waqtiga 2 saacadood

10 daqiliq oo dheeraad ah ku akhri dhammaan waraaqaha si aad u hubiso.

TILMAAMO:

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay 16 warqadood oo daabacan.

Tiri imika, oo wargali horjoogaha hadii ay wax kaa maqan yihiiin ama ay dheeraad yihiiin.

QAYBTA 1AAD:SHEEKO IYO EREYO	30-dhibcood
QAYBTA 2AAD:MAANSO	15-dhibcood
QAYBTA 3AAD: AF-MALDAH	15-dhibcood
QAYBTA 4AAD: MAAHMAAHYO IYO NAXWE	20-dhibcood
QAYBTA 5AAD: CURIS	20-dhibcood
WADAR GUUD	100 Dhibcood

Boggan u adeegso dheeraad ahaan [Jama saxayo waxa ku qoran.]

Q 1aad:

(30 dhibcood)

B) Akhri sheekadan ka dibna ka jawaab weydiimaha ka hooseeya

Xilligu waa goor wax-saar oo sansaan colaadeed ka jiro geyiga lagu nool yahay. Hooyo kastaa farta ayey wadnaha ku haysaa, iyadoo ka werwer qabta bal in uu wiilkeedii nabab qab ku soo hoyan doono iyo in kale. Sidoo kale Marwo kasta bed-qabka saygeedu saacad kasta waa fikirka maankeeda ku jira. Waayeelka cidhib-xumada colaadda yaqaanaa wuu baasaysanayaa ifafaalaha muuqda, balse barbaarta war-moogga ah ee aan weli ku guban dabka iyo dambaabirada ditirtu waxay u daddaabo-xidhan yihiiin duullaan iyo weerar, daadinta dhiiggana wax weyn uma arkayaan. Nin karmeedka nabada ka taliyaa hadh iyo habeen waano, abhin, tusaalayn iyo wacdi buu ku jiraa, balse in belo jecel oo ibleysku duufsaday ayaa iyaguna beesha ka mid ah, oo intaa guubaabo colaadeed ku gabayaya, gamaska iyo seeftana u lisanaya dhagarta muslimka.

Walaaca waayeelka iyo wax-garadku keliya kuma sal laha cabsida ay ka qabaan uur-gumaarka laga dhaxlo colaadda, balse waxa intaas u dheer inay colaaddu tahay mid sokeeye. Waa colaad gurigaaga iyo gondahaaga taalla, godobteeduna gogoshaada jiifto. Waa calaad marka aad guulaysto seedigaa la gawracay marwada aad qabtana ilmadu ka hibitiq leedahay, marka lagaa gacan sarreeyana meydkaagu gego cidlo ah yaallo ooridaada iyo gurboodka aad dhashayna barooranayaan. Waa colaad mar kasta guul darro ah welibana gunnimo iyo gocashana ka tegaysa.

Sidii horeba loo yidhi "Belo laba qad ah lama arage" caawa reer Faarax ayey belaayadu marti u tahay, oo golahooda gogosheeda dhigatay iyadoon cidna kala tashan. Mar qudha ayey qaylo yeedhay oo dumaradii reerka joogay baroor isku dareen, "hebeloow ba'ayeey, Cadawgay faraxyeey,". Inkastoo Faarax jiifay kolkiiba wuxu ku kacay sawaxanka iyo uugaanka isku bulladay. Dhawaqa baxayaa waa mid dhiillo oo la mid maaha kii faraxa iyo raynraynta lagu yaqaanay, waayo waa oohin ee alalaas maaha. Misna garay codadka baxayaa inay yihii ooridiisii Kaaha iyo dumaashidii Weris. Haddii uu gogosha ka kac is yidhi ayey naxdintii intay mijaha qabatay uu daba-jugle u dhacay. Da'da uu yahay oo todobaatanka hal weydaaratay ayaan ku simayn inu degdeg u boodo. Seedaha debcay iyo lawyada daalay gu'ga

uu jiray oo qudhi ma keenin balse waxa badh ka ah diista iyo rafaadka uu kala kulmay baro-kaca iyo qaxa colaaduhu dhaliyeen.

Bisinka qabsay oo hinqay, si dirqi ah oo dani baajin weydayna u kac, dibadda u soo bax una dhaqaaq geestii codku ka baxayey. Argagax illayn looma dhinto!! qofkii ugu horreeyey ayaa ku salaamay war aan dhegtu jeclaysan oo qalbiga Faarax u geystay dhaawac Alle-yaqaanku ka bogsan karo, adduun-yaqaankase xayndaabka samaha ka saaraya. “inankaagii Yuusuf iyo labadii wiil ee aad adeerka u ahayd ee Cali iyo Guuleed ayaa la dilay” ayuu si lama fiaan ah mid aan ka fiirsani ugu dedejiyey. “Adeer maxaad tidhi” Sidi qof an maqlayn ayuu mar labaad u weydiiyey, balse intii uun baa haddana dhegihisu guddoomeen. Is diidsi warka xun ee loo sheegayo oo kolkhiba qofka u sheegaya oo da’diisu labaataneeye tahay gu’ga uu jiro ku dur. Nafsiisa ku tidhi “kuraygan yari looga qaateen maahee bal qof kale oo war-galeena ka xaqiji” Warku xumaa oo meesha uu xadanteyey fogaa!! Qodh iyo xero waaba Kaaha iyo Weris labada ruux ee meesha lagu urursan yahay. Durba garay in warka loo sheegay run yahay, runtuse waa mid aanu jeclayn.

Nabar aanad filayni xanuun badanaa!!! Faarax gebigiisiiba jaho-wareer baa qabsaday, dhan uu ka jeedo iyo dhan uu u jeedo ayuu kala garan waayey. Ma barooran karo sida dumarka oo dhaqankaan ogolayn, mana adkaysan karo oo waa beer wax dhalaye, ilmo duunka hoose ka timi ayaa labadiisa indhood iliilo ay maraan ka dhigtag ilaa ay radiyeen gadhiisa iyo boggiisaba. Sidi rag yeeli jiray yeel oo qarsay dareenkiisa fir-ka-naxa ah, iskuna day inu dumarkii u caqli celiyo. Waase goorma, ma goor hooyo wiilkeedii weyday la aamusiuun karaa? Danbaa tidhiye, ka dhaqaaq oo xaggaas raggu joogay u kac. Sidi warku u jiray dhabituna ahayd oo aan kala dhintnayn ayaa looga dhagac siiyey. “Nimankii reerkeenu labada qof ka dileen kal hore, ayaa dhagarta geystay oo waa Aanadii raggaas” Aw Muxumed Sugaal oo ragga meesha jooga ugu da’ weynaa ayaa u xaqijiyeey.

Marka warkan loo sheegayo, Labaatan nin oo wada xigtadiisa ah iyo raggii ay dhaleen oo sooc ah weeyaan cidda uu dhix joogaa. Kolkhiba weedhaha dhegahiisa ku soo dhacayaa maaha qaar wacan. Mid baa ka ag yidhi “Faaraxoow waa loo aariye ha u ooyin” mid kale ayaa ku raacay oo yidhi “Niman aarsani uurkii hooyadii buu ku jiraaye meydka inoo aasa oo raggaasi waran baa innaga dhexeeyee waanwaan iyo kal-nugayl isuma ogin” Faarax inta uu dhegaysanyey ayuu go,aan nin colaad yaqaanaa ku diirsanayo caydiguna ka cadhoonayo hoosta ka gaadhay. “Ma meydka ha la aaso, mise hadalada kale, meydka ha la aaso waan idinla qaataay, talose weli inoo dihine bal waagu ha inoo beryo arrin waa la bariiyaaye” ayaa

hadalkii ku soo gunaanaday, haddii hawraarsan la yidhina ardaagii gurigiisa intuu ku weysaystay ayuu Alle weydiistay sida san inu waafajiyo.

Habeenkii oo dhan kolba waxa uu gees ka eegayey waxa dhici kara haddii la aar-goosto oo col iyo weerar la guddoonsado. Wuxu muraayada male-awaalka ka daawanayey hooyooyinka goblamaya, guxushaa gedihuusa ah oo ilmaynaya, gurbood aabihii dhalay haadku ku geylamay iyaguna agoomoobay. Aanada xididka iyo eedda gacalka is wada dhalay cidhib-xumadeeda ayuu xubin xubin u eegay. Haddii uu waagii soo dhawaaday oo uu wadaadkii addimay ayuu intuu Alle wakiishay go,aankiisa hoosta ka xarriiqay.

Haddii qorraxdii nin jooggii soo baxday ayey raggii ay ballansanaayeen kadinka reerka isa soo tubeen. La wada hadal cabbaarna la muran, tolkiise wuxu isku raacay in la aar-goosto. "wiilashaydii ma ii soo noqonayaan oo aakhiro ma ka imanayaan" ayuu Faarax si deggan raggii u weydiiyey. Mar qudha ayaa la wada aamusay oo jabaqdi go'day, balse qofna ma jawaabin. "wiilashaydii ma ii soo noqonayaan oo aakhiro ma ka imanayaan" ayuu mar kale haddana ku celiyey. Mar qudha ayaa raggii meesha wada joogay cod isku mid ah ku wada dhawaaqueen "maya". Intuu Faarax foorarsaday ee dhulka xarriiqay ayuu si dhiirran dadkii mar qudha ugu soo jeestay. "taladaydu noqon mayso mid Aabo kale oo aniga ila leeg ka oohisa hooyo kalena ka nixisa, seedigayna inankayga ugu aari maayee, aayatiinka ubadkeena iyo nabad xididkeen lagula noolaado ayaan siistay"

B) Goobo geli weedh kasta jawaabta ku saxda ah

(10 X 2 = 20 dhibcood)

1. Xilliga raggu kadinka guriga Faarax isa soo tubeen waxay ahayd
 - b) Duhur
 - t) Galab
 - j) Barqo hore
2. "belo laba qad ah lama arag" waxa looga jeedaa
 - b) Habeen kasta belo ayaa dhaecka oo marka aanay ku haysan cid kale ayey haysataas
 - t) Qoyska Faarax ayey ku badnayd
 - j) Way ku cusbayd
 - x) Beladu mar kasta way soo mari jirtay
3. Da'da Faarax waxay ahayd:
 - b) 70 jir
 - t) 60 jir
 - j) Guxushaa 40 jir ah
 - x) 71 jir
4. Seedaha dabcay iyo lawyada daalay waxa ugu wacnaa:
 - b) Nafaqo darro iyo qax
 - t) Cimri iyo rafaadka colaadaha
 - j) Xanuun iyo macaluul
 - x) Nabaro cid kale u geysatay

5. Colaada jirtay waxay ahayd mid:

- b) Dawlado ka dhexaysa
- t) Cadaw dibada ka yimi la is hayo
- j) Sokeeye
- x) a iyo b

6. "Haddii uu gogosha ka kac is yidhi ayey naxdintii intay mijaha qabatay uu daba-jugle u dhacay."

Af-maldahanaha ku jira weedhaa kor ku xusani waxa uu yahay:

- b) Sillan-sugan
- t) Shareere
- j) Legaado
- x) Qofayn
- Kh) Midnaba

7. Nin karmeedka nabada ka taliyaa waxa uu mashquul ku ahaa :

- b) Dantiisa gaarka ah
- t) Danta guud
- j) Isku dir
- x) Midnaba

8. Afada Faarax waxa la odhan jiray:

- b) Weris
- t) Kaaha
- j) Khadiija
- x) Midna

9. “dhaawac Alle-yaqaanku ka bogsan karo, adduun-yaqaankase xayndaabka samaha ka saaraya” Weedhaas kor ku taalla waxa loola jeedaa:

- b) Dhib nin wanaagsan oo qudhii qaadi karo
- t) Dhib qof kasta oo nooli u adkaysan karo
- j) Dhib aan laga soo waqsan Karin
- x) Midnaba

10. Dulucda sheekadu waxay ina tusaysaa in qofka gobta ahi ka fikiro:

- b) Naftiisa iyo maalkiisa
- t) Mustaqbalka dadkiisa
- j) Cidhib-xumada uu keeni karo dagaalka sokeeye
- x) b iyo j

T) Ereyadani siday sheekada ugu jiraan ku manee kuna hor qor: (10 dhibcood)

1. Sansaan: _____
2. Baasaysi: _____
3. Daddaabo-xidhnaan: _____
4. Alalaas: _____
5. Aayatiinka: _____

Q2aad: MAANSADA

(15 dhibcood)

Faahfaahi ujeedka iyo dulucda tuducyadan soo seoda;

1. Muslinka iyo gaalada dirkaba waan macno aqaane
Malaa'iigta naartiyo jannadu way igu murantaaye
Ninkii maalmo badan soo jiree madaxu boosaystay
Ee inan rag maamuli yaqaan wuu I maan garanne
Nin kastaw halkii kula ee muhato laabtaadu
Iska soo mar waa kuu mubaax marinkad doontaaye
-
-
-
-
-
-
-
-

2. Lo'da dhogorta suubsuuban ee sac iyo weysheeda
Waa seer-ma-weydada intay siinad leedahaye
Adawgayba kama saadin jirin subag guduudnayde
Iyaduna sidaas bay ahayd saaka odhan mayo.
-
-
-
-
-
-
-
-

3. Waa dhagax nafloo hayjadaa dhigay ilaahaye
Waa dhabarka seedaha ku yaal sidigta dhaameele
Dhadhaab adag haddaanuu ka bixin laguma dhaateen.
-
-
-
-

4. Afar laba lix goor buu sidaa iiga loogsadaye
Mar uun igama liibaansanine way ladaabsadaye
Alla labiyo toban goor miyaa liidnimo I raadday?
-
-
-
-

5. Mar hadduu suldaan igu xil lihi igaga xayndaabtay
Xadhigiisa qabo aadmi kale kuma xurmeeyeyeene
-
-
-
-

Q3aad: Af-maldahanaha

(15 dhiveed)

Akhri tuducyada soo socda, mid kastana ka jawaab weydiimaha hoos yaalla

1. Dahabooy sidii madax guyoo muuqday baad tahaye
Marso curatay mood iyo hillaac miidha baad tahaye
Sidii mayeyga roob oo kalaan kugu masaalaa

Tuducyadan ka soo saar

- b) U ekaha
- i) Loo ekaha
- j) Qalabka isku ekaysiinta
- x) Xaggay labada humaag isaga eeg yihiin

-
-
-
-
-
-
-
2. Inta dhiishu caanaha taqaan dherina laadlaado
Ee ay dhamacda jiilaal fadhidoo dhagaxa hoostiisa
Wallee taan wax sii dhiganin baan dhereg dambe u aayin
Oo markay magaaladu dhashana dhar iyo soor qaadan.

- b) sheeg af-maldahana ku jira
-
-
-
-
-

- i) Sababee doorashadaada
-
-
-
-
-

3. Boggayga waran baad badheedh u dartee

Bagaad I dishoonad iba bixin

b) sheeg af-maldahana ku jira

c) sababee doorashadaada

Q4aad: Maahmaahda iyo Naxwaha

(20 dhibcood)

B. Maahmaahda

15 dhibcood

1. “Qun-yar socde qodaxi ma muddo”

b) falanqee ujeedadada loo cuskado maahmaahdan.

- t) Sida maahmaahda ka muuqata, ma mid labka uun u gaar ah baa mise way
wadaagaan labka iyo dheddigu ? Waayo

2. “Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan” iyo “Nin aan shaqaysan shaah ma cabbo”

Si kooban uga hadal labadan maahmaahood waxay isaga mid yihiiin iyo waxay ku
kala duwan yihiiin

T. Naxwaha

5 dhibcood

Weedh kasta ku buuxi Magac-u-yaalka weydiimeed ee ku habboon.

1. Waa _____ ta dishay wiilku?
2. _____ kelidii lagaga tegay xoolaha?
3. Bal I tus _____ kuu xoog sheegtay?
4. Cuudka iyo Cilmiga _____ kula fiican?
5. _____ baa ku dhaeda inay ii jawaabto?

Q 5 aad: Curiska

20 dhibcood

Qor curis sisaynaya dayaxa faa'iidooyinkiisa oo ka kooban 200 kalmadood.
